

Isku xiraha Carruurnimada Hore | Luulyo 2025

Wargeyska saddexdii biloodba mar ah ee ku saabsan daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore.

Waxyaabaha ku jira wargeyskan

Isku xiraha Carruurnimada Hore Luulyo 2025	1
Miisaaniyadda cusub ee mushaarka iyo warbixino kale ee waxbarashada hore	2
Astaamaha Horumarka Carruurta Hore ee la Cusboonaysiinayo ee Soo Socda.	3
Heerarro Cusub oo Shahaado NAEYC ah iyo Qiimeynta Parent Aware	3
Help Me Connect waa meel muhiim ah oo laga helo dumarka ka caawiya umulista (doula) ee Minnesota	4
Ilooyin loogu talagalay qoysaska, carruurta, iyo bixiyeyaasha	5
Ma qabtaa ra'yi celin?	5
Wax su'aalo ah?	5

Nagu soo biir wicitaanka xiga ee wadaxiriirka

Ma qabtaa su'aal ku saabsan barnaamij ama siyaasadda? Barayaasha carruurta hore waxay u gudbin karaan su'aalhooda dowladda si looga jawaabo inta lagu jiro kulanka Xiriirka Carruurta Hore. Wicitaannadu waxay dhacaan saddexdii biloodba mar, waxaana lagu qabtaa onleen ahaan WebEx. Haddii aadan awoodin inaad ka qaybgasho, wicitaanku waa la duubaa, su'aalaha iyo jawaabahuna waxaa lagu heli karaa qaab qoraal ah. Turjumaadaha afafka Isbaanishka, Hmong-ga, iyo Soomaaliga ayaa diyaar ah. Wax dheeraad ah ka ogow [Early Childhood Connector website bogga Xiriiryaha Carruurta Hore](#).

- **Taariikhda wicitaanka xiga:** Talaado, Oktoobar 21, 2025, 7–8 fiidnimo
- **Isku xirka kulanka:**
<https://minnesota.webex.com/minnesota/j.php?MTID=m8bec87608d692be6d4924585b35ec607>
- [Halkaan ku soo gudbi su'aalahaaga](#). Su'aalaha waa in lagu soo gudbiyaa laba toddobaad ka hor kulanka.

Miisaaniyadda cusub ee mushaarka iyo warbixino kale ee waxbarashada hore

Miisaaniyadda mushaarka ee barayaasha carruurta hore waxay qayb ka tahay istaraatiijiyad qaran oo looga gol leeyahay in lagu xalliyo mushaarka hoose ee ka jira goobaha daryeelka iyo waxbarashada hore. Warbixinta sharci-dejinta ee cusub ee la yiraahdo, [Miisaaniyadda Mushaarka iyo Aqoonta La Qiyaasi Karo ee Shaqaalaha Daryeelka Carruurta iyo Waxbarashada Hore](#), waxay soo bandhigaysaa hab miisaaniyadeed cusub oo loogu talagalay barayaasha waxbarashada hore ee carruurta Minnesota. Warbixintu waxay sidoo kale ku talinaysaa in mushaarka barayaasha carruurta hore uu la jaanqaado kan macallimiinta K–12 ee haysta aqoon iyo waayo-aragnimo la mid ah. Talooyin kale waxaa ka mid ah in mushahar aasaasi ah lagu saleeyo kharashka nololeed ee qofka, iyo in lagu tixgeliyo aqoonta uu qofku helay iyada oo loo marayo tababar iyo waayo-aragnimo – marka lagu daro waxbarashada rasmiga ah. Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan warbixintan ama sida loogu isticmaali karo miisaaniyadda mushaarka il ahaan, la xiriir: Jessica Richards at jessica.richards@state.mn.us.

Dowladdu waxay dhowaan daabacday warbixino kale oo la xiriira daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore, oo ay ka mid yihiin:

- Si Dhib Leh u Qotomaya oo Horeyna Aan u Socon: wargelinta Baahida Sinaanta xagga Mushaharka iyada oo loo marayo barnaamijka Tijaabada Sinaanta Mushaharka ee Shaqaalaha Daryeelka Hore iyo Waxbarashada Minnesota ((Dec. 2024) [Barely Getting By and Never Getting Ahead: Informing the Need for Pay Equity Through Minnesota's Early Care and Education Workforce Pay Equity Pilot](#) (Dec. 2024)
- Kaalmada Daryeelka Carruurta iyo Dejinta Heerka Qiimaha ku Saleysan Kharashka [Child Care Assistance and Cost-Based Rate Setting](#) (Jan. 2025)
- Xusuusin Sharciyeed: Tirada Deeqaha la siiyay Qaataayaasha REETAIN iyo Natiijooyinka (Dis. 2024) [Legislative Memo: Number of Grants Awarded to REETAIN Recipients and Outcomes](#) (Dec. 2024)
- Warbixin Sharciyeed: Barnaamijka Taageerada Lacag-bixinta ee Great Start Compensation (Jan. 2025) [Legislative Report: Great Start Compensation Support Payment Program](#) (Jan. 2025)

- Warbixin Sharciyeed: Nidaamka Qiimaynta Tayada iyo Horumarinta ee Parent Aware: Qiimayn iyo Hal-Xiddig (Dis. 2024) [Legislative Report: Parent Aware Quality Rating and Improvement System: Evaluation and One-Star Rating](#) (Dec. 2024)

Astaamaha Horumarka Carruurta Hore ee la Cusboonaysiinayo ee Soo Socda.

Astaamaha Horumarka Carruurta Hore (ECIPs) waxay u adeegaan sidii Heerarka Waxbarasho Hore ee Minnesota, iyadoo qeexaysa filashooyinka la wadaago ee ku saabsan waxa ay carruurta yaryar (da'da 0 ilaa 5 sano) baran karaan oo samayn karaan marka ay korayaan.

Cusboonaysiinta ECIPs waxay xaqiijineysaa in heerarku ay weli khuseeyaan, ku saleysan yihiin cilmi-baaris casri ah, isla markaana ay ku jiraan dhammaan carruurta Minnesota. Ujeedooyinka ugu waaweyn ee habkan cusboonaysiinta waxaa ka mid ah:

- In lagu daro cilmi-baarisii ugu dambeeyay ee la xiriira korriimada carruurta si loo muujiyo hababka ugu wanaagsan ee hadda la adeegsado
- In la xoojiyo isku-dhafnaanta iyo metelaadda bulshada kala duwan ee Minnesota, oo ay ku jiraan asalka dhaqameed iyo afeed kala duwan iyo awoodaha korriineed ee kala geddisan
- In la waafajiyo ECIPs iyo Heerarka xannaanada dugsiga ee Minnesota si ay u fududaato kala guurka carruurta laga bilaabo waxbarashada hore ilaa xannaanada dugsiga

Dokumentiyada kama dambaysta ah waxaa lagu daabici doonaa mareegaha Waaxda Waxbarashada ee Minnesota iyo Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska bisha **Luulyo**. [Wax badan ka ogow habka dib-u-eegistas.](#)

Heerarro Cusub oo Shahaado NAEYC ah iyo Qiimeynta Parent Aware

Ka hor Maajo 2025, ururka NAEYC wuxuu bixin jiray hal heer oo kaliya oo shahaado ah. Hadda, NAEYC waxay bixisaa saddex heer: aqoonsi (recognition), shahaado (accreditation), iyo shahaado dheeraad ah (accreditation plus). Laga bilaabo hadda, barnaamijyada haysta shahaadada NAEYC waa inay doortaan mid ka mid ah heerarkan ay doonayaan inay ku sii socdaan..

Laga bilaabo Luulyo 1, 2025, barnaamijyada doorta heerarka *shahaado* ama *shahaado dheeraad ah* ee NAEYC waxay u qalmi doonaan inay isticmaalaan Jidka La Dedejiyay ee Qiimeynta Parent Aware (Parent Aware Accelerated Rating Pathway). Intaa waxaa dheer, heerarkan cusub waxay sidoo kale u qalmi doonaan 15% sare ee kabka barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta, taasoo loogu talagalay barnaamijyada leh tayo sare. Isbeddelkan wuxuu siiya barnaamijyada dabacsanaan dheeraad ah oo ku saabsan micnaha "shahaado hayn" si loogu oggolaado ikhtiyaarro cusub oo lagu xaqiijinayo shahaadooyinka.

Kalfadhiga Sharci-dejinta 2025 – Warbixin ku saabsan Ruqsad Bixinta Daryeelka Carruurta

Kalfadhiga caadiga ah ee sharci-dejinta sannadka 2025 wuxuu dhammaaday Maajo 19, 2025, waxaana xigay kalfadhi gaar ah bishii Juun si loo dhammaystiro hawlaha sharci-dejinta. Warbixinno cusub ayaa loo diray bixiyeyaasha xannaanada carruurta ee qoysaska iyo xarumaha daryeelka carruurta ee ruqsadaysan, iyadoo si kooban looga warbixiyay isbeddellada ku yimid ruqsad bixinta. Qorshe faahfaahsan oo lagu hirgelinayo isbeddeladan barnaamijyadaas ayaa la diyaarin doonaa goor dambe. Xarumaha daryeelka carruurta ee shahaadaysan (certified) ayaa horay u helay qorshe hirgelin oo dhamaystiran, kaas oo muujinaya isbeddelada saameynaya barnaamijyadooda.

Si aad u akhrido warbixinadan ama isugu diiwaangeliso wararka cusub, booqo bogagga internetka ee [licensed family child care](#), [licensed child care centers](#), iyo [certified child care centers](#).

Help Me Connect waa meel muhiim ah oo laga helo caawimaadka dumarka umulista (doula) ee Minnesota

Sanad kaddib markii la bilaabay liiska doulas-ka, website-ka ee Minnesota wuxuu noqday mid ka mid ah meelaha ugu ballaaran ee laga helo doulas, isagoo leh siyaabo sahlan oo raadinta ah si fududna loo helo doula ku habboon.

Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) waxay dhiirrigelinaysaa qoysaska inay doula helaan iyaga oo adeegsanaya website-ka [Help Me Connect](#) waxayna codsi u direysaa dhammaan doulas-ka iska diiwaangeliyaan si bilaash ah.

Websiteka Help Me Connect wuxuu leeyahay khariidad si loo raadiyo doulas iyo in ka badan 30 doorasho shaandhayn ah, oo ay ka mid yihiin adeegyada umulista guriga, dhaqamada ama caadooyinka diimeed, iyo ikhtiyaarada lacag bixinta.

Doula-yaashu waxay bixiyaan taageero jidheed, mid dareen iyo mid aan caafimaad rasmi ahayn ayna siiyaan waalidka inta ka hor, inta lagu jiro, iyo dhalmada ilmaha kaddib. In la helo doula la wadaaga asalka, waayo-aragnimada nolosha, ama dhaqamada dhaqameed waxay wax weyn ka tari kartaa khibradda dhalmada.

Cilmi-baarisutu wuxuu muujisay in taageerada doula ay keeni karto faa'iidooyin ay ka mid yihiin:

- Inay yaraato muddada foosha
- Inay yareyso fursadda dhalmada qalliinka (C-section)
- Inay bixiso farsamooyin aan caafimaad rasmi ahayn oo lagu yareeyo xanuunka
- Inay hoos u dhigto walaaca iyo walbahaarka
- Inay taageerto lammaanaha ama seyga
- In caruurtu ay dhashaan iyadoo garaacista wadnahooda iyo neefsashadooda ay fiicantahay.

Taageerada doula-du waa mid si gaar ah muhiim ugu ah bulshooyinka la kulma kala duwanaansho iyo cadaalad-darro, sida dadka Madow, dadka asaliga ah ee Mareykanka (American Indian), dadka midabkooda uu ka duwan yahay caddaanka, dadka dakhliga yar, bulshada LGBTQ, ama kuwa ku nool meelaha miyiga ah. **Doula** waxay ka

caawin kartaa qoysaska inay dareemaan ammaan dheeraad ah, inay awood u yeeshaan go'aan ka gaarista jirkooda iyo ilmahooda, iyo inay xiriir bulsho yeeshaan oo xoogan.

Wax dheeraad ah ka ogow doulas iyo shaqaalaha dhalmada adigoo booqanaya bogga Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH): [Doulas and Birth Workers in Minnesota](#).

Ilooyin loogu talagalay qoysaska, carruurta, iyo bixiyeyaasha

- [Help Me Connect](#)
- Xafiiska Dacwo-qabta Bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee Qoyska [Office of the Ombuds for Family Child Care Providers](#)

Ma qabtaa ra'yi celin?

Nala wadaag fikirkaaga ku saabsan wargeyskan adigoo ka qeybgalaya [sahmin koobany](#). Jawaabahaaga waxay dowladda ka caawin doonaan sidii ay u horumarin lahayd isgaarsiinta ay la leedahay bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo barayaasha waxbarashada hore.

Wax su'aalo ah?

Wixii su'aalo ah, iimayl u dir rachel.blair-paladino@state.mn.us.